


Comcast RISE waxaa ka go'an taageerista kobaca ganacsiyada yaryar, ayada oo sare loo qaadayo ujeedada kala duwanaanshaha bulshada, sinnaanta iyo wadajirka, iyo sidoo kale maalgashiga bulshada. Barnaamijka waxaa loo dhisay sidii looga caawin lahaa ganacsiyada iyo bulshooyinkooda sidii ay u hormari lahaayeen ayada oo diiradda la saarayo kobaca dhanka dhaqaalaha ah. Sannadkaan, Comcast RISE waxay ku abaalmarin doontaa 500 oo qof oo ka faa'iisaysan doonaa kuwaas oo ku kala sugan shan magaalo deeq isugu jirta adeegyada talo bixinta ganacsiga, ilaha waxbarashada, deeqo lacageed, wax soosaar hal abuur leh, warbaahinta, iyo adeegsiga teknoolojiyadda.

Comcast RISE waxay u taagan tahay Matalaad, Maalgashi, Awood iyo Xoojin. Comcast RISE waxaa la aasaasay 2020 si ay ganacsiyada yaryar ee sida aadka ah u saameeyay Covid-19 uga caawiso sidii ay uga soo kaban lahaayeen horumarna u gaari lahaayeen. Intii lagaa jiray barnaamijkeeda bilowga ahaa ee labada sanno ahaa, 13,000 ganacsiyo yaryar ah ayaa lagu abaal mariyay in ka badan $110 milyan oo ah deeqo iskugu jira lacag, suuq gayn, iyo teknoolojiyad. Anaga oo adeegsanayna wixii aan ka baranay xiliyadii hore, waxaan ku faraxsannahay in aan soo celino Comcast RISE sannadka 2023. Maadaama ganacsiyada yaryar ay kasoo baxayaan kasoo kabashada cudurkii safmarka ahaa ayna usoo gudbayaan saarista diiradda balaarinta iyo koritaanka, Comcast waxay sii wadi doonaan dadaalkooda waxayna sidoo kale gacan ka gaysan doonaan kordhinta tirada ganacsiyada, ayaga oo sii wadaya saarista diiradda kala duwanaanshaha, iskudhafnaanta, iyo maalgashiga bulshada.

Comcast RISE waa mid kamid ah barnaamijyada dhowrka ah ee ay Comcast korjoogtayso ayaga oo qayb ka ah Project UP kaasoo loogu tala galay soo xirista firaaqa dhanka adeegyada casriga ah ka jira.

### TAFAASIISHA BARNAAMIJKA

500 abaalmarin guud ahaan ayaa loo qaybin doonaa sida soo socota:

- 100 oo ah ganacsiyadayaryar eemaalinkasta
- Ganacsi kasta wuxuu heli doonaa:
  - $5,000 oo ah deeq lacageed
  - Wax soosaarka hal abuurka leh, warbaahinta, iyo adeegsiga teknoolojiyadda
  - Ilaha waxbarashada
  - Adeegyada talo bixinta ganacsiga
- Muddada cosigu waa Juun 1-30, 2023
- Deeqaha waxaa la shaacin doonaa marka la gaaro dhammaadka Agoosto waxaana abaal marinta la bixinayaa Sebtambar 2023
- Codsiyada waxay ku diyaarsanaan doonaan ayaga oo onleen ah halkaan www.comcastrise.com.

### U QALMIDDA BARNAAMIJKA

Si ay xaq ugu yeeshaan, ganacsiyadu in ay:

- Yihiin kuwo la aasaasay ilaa 3 sanno ama kasii badan
- Leeyihiin 100 ama ka yar oo ah shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa galinka shaqeeya
- Si gaar ah loo leeyahay una shaqeeya
- Ku yaalaan goobaha dhu lalkaasoo socda:
  - **Baltimore** (Magaalada Baltimore)
  - **Detroit** (Ismaamulada Macomb, Oakland, Wayne, Washtenaw)
  - **Memphis** (Ismaamulka Shelby)
  - **Philadelphia** (Ismaamulka Philadelphia)
  - **Portland** (Ismaamulada Multnomah)
- Si aad u liiska u qalmidda oo dhammaystiran bookho www.comcastrise.com.

**Hadda waxaa la joogaa**
**Xiligii aad Kori lahayd**
Codso maanta.
**ComcastRISE.com**

COMCAST RISE

© 2021 Comcast. All rights reserved. Comcast confidential and proprietary information.